

Imtixaanka qaranka waxbarashada dugsiyada sare

Waa ku salaamaynaa!

Waxaad mardhow fulindoontaa inaad samayso imtixaanka qaranka oo aad ku gelidoonto hal ama dhowr maado sida ingiriiska, xisaabta, iswiidhiska oo aad ku gelidoonto luqada dadka ajaanibka loogu talagalay. Iyadoo ay ku xiran tahay borogaraamka aad qaadansid markaa hal ama dhowr imxitaan ayaad maado kasta ka samaynaysaa

Ujeedada laga leeyahay imtixaanka waa sidii macalimiinta loo caawinlahaa sidii ay u qiimayn lahaayeen iyo sidii aad adigu ugu guulaysan lahayd oo aad u gaadhilayd qorshaha kooraska lagu dhigayo hadda una gaadhilahayd shuruudihii aqoonta ee loo baahnaa inaad gaadho. Imtixaanku wuxuu kaloo qayb ka qaadanaa sidii loo qiimayn lahaa sidii ay aqoonta ardaydu isku mid u noqon lahayd.

Waxyaabaha ay ka kooban yihiin qorshayaasha maadooyinka koorasyada kala duwani waxay aasaas u yihiin koorsooyinka imtixaanada markay noqoto su'aalaha qaabkooda iyo qiimayntaba. Ardaykasta wuxuu helayaa fursad sida ugu haboon ee uu aqoontiisa ku soo bandhigayo.

Hal imtixaan oo keliya laguma oggaankaro wax walba. Natiijadada ka soo baxda imtixaanka qaranka waxay ka mid noqonaysaa qayb ka mid ah qiimaynta taas oo saldhig u noqonaysa shahaada koorsooyinkaaga. Imtixaanka kama dambaysta ee qaranka oo dhan laga qaadayaa qayb muhiima ayay ka noqodoontaa marka shahaadada la bixindoono, laakiin macalinku wuxuu samayndoona qiimayn guud oo ku saabsan aqoonta aad adigu maado kasta u leedahy.

Luqadda ingiriiska

Iyadoo ay ku xidhan tahay borogaraamka aad qaadaayso inta aad ku gudajirto dugsiyada sare waxaad samayndoontaa imtixaanka qaranka kaas oo luqadda ingiriiska 5aad oo keliya ama 5aad iyo 6aad.

Imtixaanka luqadda ingiriiska waxay ka kooban tahay qayb afka ah iyo qayb xiriirin qoraala iyo akhris iyo weliba qayb fam u baahan oo dhegeysiya. Qaybta qoraalka ingiriiska ee 6aad waxa jira waraaqo uu qofku uu ku sii diyaargaroobayo kuwaas oo aad ka sii shaqaynaysid inta ka horeysa imtixaanka. Hase yeeshee maalinta aad imtixaanka u fadhiisanaysid laguma siinayo waraaqihii aad hore uga soo shaqaysay ee tijaabada ahaa.

Luqadda iswiidhishka iyo luqadda iswiidhishka ee dadka ajaanibka loogu talagalay

Iyadoo ay ku xidhan tahay borogaraamka aad qaadaayso inta aad ku gudajirto dugsiyada sare waxaad samayndoontaa imtixaanka qaranka ee kooraska 1aad oo keliya ama labadaba kooraska 1aad iyo kan 3aad.

Imtixaanka luqadda iswiidhka 1aad iyo luqadda 1aad ee iswiidhishka ee dadka ajnabiga loogu talagalay waxay ka kooban yihiin qayb afka ah, qayb imtixaan oo akhris iyo qayb qoraala.

Imtixaanka luqadda iswiidhka 3aad iyo luqadda 3aad ee iswiidhishka ee dadka ajnabiga loogu talagalay waxay ka kooban yihiin laba qaybood, qayb qoraala iyo hal imtixaan oo afka ah.

.

Labada imtixaanba waxay leeyhiin waraaqo la koobigareeyey kuwaas oo qeexaya sida uu imtixaan-ku u samaysan yahay iyo waxa lagaa sugayo inaad adigoo ardaya keento .

Xisaabta

Iyadoo ay ku xidhan tahay borogaraamka aad qaadaayso inta aad ku gudajirto dugsiiga sare waxaad samayndoontaa imtixaanka qaranka kaas oo ah hal ama koorasyo badan. Imtixaanka koorasku wuxuu ka koobnaan doonaa dhowr qaybood kuwaas oo aad maalinta aad imtixaanka samaynaysid gelidoontid sadex kamida, adigoo isticmaalaya ama aan isticmaalayn qalbka dhigitaalka. Waxa laydinkula talainayaa wakhti nasosho oo dheer oo ay qado ku jiro una dhaxaysa wakhtiyada labada imtixaan la samaynayo.

Warbixin intaa dheer waxaad ka heleysaa macalinkaaga

Wasaarada waxbarashadda ayaa ka mas'uula imtixaanada qaranka oo dhan. Imtixaanka waxa lagu soo saaraa oo lagu sameeyey jaamacadda. Su'aalaha imtixaanka waxa lagu tijaabiyey dugsiyo badan oo ku yaala wadanka gudihiisa. Ardayda iyo macalimiinta waxay soo jeediyeen fikrido markaa su'aalaha imtixaanka dib ayaa loo sii hagaajiyey oo looga shaqeeyey si faahfaahsana looga dooday intaan imtixaanka adiga gacanta loguu gelin. Waxaanu rajaynaynaa inaad u aragto inuu imtixaanku fiican yahay isla markaana aad ka hesho fursad aad ku muujiso aqoontaada.

Cida lagala xiriirayo wasaaradda waxbarashada

nationellaprov@skolverket.se